



## Talo ku socota waalidiinta kahor inta aad dib loo furin iskuuladda.

---

Qof walba dareen gooni ah ayuu qaba oo ku saabsan dib ugu noqoshada iskuulka. Waalidiinta iyo caruurta qaarkood aya laga yaabaa in ay ku faraxsanyihiin, qaarkoodna waxa suurto gal ah in ay xoogaa walaac ah ka qabaan. Taasi waa caadi. Heysashada nidaam wanaagsan waxa uu saameyn ku yeelan doonaa caawina doonaa cunugaaga in uu la qabsado kuna dego. Xusuusi in la wadaagida fikradahooda iyo dareemahooda dadka kale ay cawin doonto.

Xusuusi in marwalba qof uu u diyaar yahay in uu caawiyo haddii ay wax ka walwalsanyihiin.

Sidoo kale waa muhiim in la xusuusiyo waxyabaha wanagsan ee kusaabsan dib ugu noqoshada iskuulka sida lakulanka saaxiibadda, malintooda oo hab iyo nidaam yeelata, iyo iyaga oo dib ugu noqda ka qeyb-qaadashada howlaha iskuulka.

Heysashada caadooyin wanwanaagsan waxa ay ka cawineysaa cunugaada in uu la qabsado kunoqoshada iskuulka. Kudhiiri gali in ay helaan cunto caafimaad leh, jimicisi, in ay la xiriiraan asxaabtooda iyo in ay helaan hurdo fiican.

Shaqo badan ayaa la qabtay si loo xaqiijiyo in dugsiyadeenu ay ku howlgalaan hab ammaan ah oo waara.

Waxaanu aragnay hormar weyn ee dhanka la dagaalanka xanuunka Covid-19. Qeybo badan oo bulshada kamid ah ayaa dib u furmay oo waxyaabo badan oo aan dhamaaneen ku raaxaysano in aan sameyno, ama ku tiirsanaano, ayaa suurto gal ah mar kale.



Mas' uuliyiinta cafimaadka dadweynaha ayaa si taxadar leh ugu fiirsaday tallaabooyinka ay tahay in laga hirgeliyo dugsiyadda si qof walba ammaankiisa loo ilaaliyo.

Waxa ay ku qanacsanyihiin in markii xeerarka iyo habraacyada loo dejiyay iskuulada uu qof walba u raaco si taxadar leh dhamaanteen si wanaagsan ayaa nalooga ilaalinaya feyraska.

Arday kasta iyo xubin kasta oo shaqaalaha ka mid ah waxa laga codsanayaa in ay is xusuusiyaan xeerarkan iyo nidaamyadan taas oo ay khasab tahay in la raaco si qof walba uu ammaan u helo. Dugsiyada waxa ay xusuusin doonaan ardeyda arimahaan iyaga oo isticmaalaya muuqaalo kuhaboon da'dooda iyo aalado kale.

Marka ugu horeysa, aad ayay muhiim utahay in qof walba oo isku arka calaamadaha Covid-19 sida qandhada, qufaca, neefta oo kugu yaraata ama kugu adkaata, ama isbadal xagga urta iyo dhadhanka ah uusan imaan Karin iskuulka. Fadlan raac hagidda HSE eek u saabsan sida la isku gaar yeelo oo wac dhakhtarkaaga. Hubi in ardeydu ay ogyihiin in haddii ay dareemaan cafimad daro xilliga ay iskuulka joogaan in ay isla markiiba u sheegi karaan macalimiintooda.

Gacma dhaqashada wanaagsan iyo nadaafada waa u muhiim dhamaan ardeyda. Hubi in cunugaagu yaqaano sida loo isticmaalo suufka ama marada afka si uu afkiisa xilliga qufuca ama hindhisada ugu daboolo ama in uu yaqaano sida loo isticmaalo suxulka xilliga hindhisada ama qufuca.

Heerka dugsiya dhexe iyo heerarka kuwa ka danbeeya, Habka kala fogaanshaha waa in ay raacaan dhamaantood.

Dugsiya hoose, caruurta da'dooda yartahay loogama baahna in ay kala fogaadaan, lakin waxaa loo habeyn doona si nidaamsan fasalka dhexdiisa.

Xilliga qaaditaanka iyo keenitaanka waxaa uu noqon karaa xilli mashquul badan. Fadlan hubi kal fogaanshaha adiga oo raacaya nidaamka hagidda ee iskuulka ee



goorta iyo meesha la aadayo. In kasta oo ay adagtahay, waa muhiim in aysan walidiintu kusoo uruurin albaabka iskuulka si ay isku dhexgalaan kahor iyo kadib iskuulka. Kala fogaanshaha ha la joogteeyo, afxirka oo la xirto, iyo in aan lagu daahin iskuulka waxa ay horseedi kartaa in iskuulku cunugaado uu sii furnaado.

Shaqaalaha iskuulka dhamaan iyo ardeyda dhigata dugsiga dhexe, waxa laga rabaa in ay xirtaan afxir.

Kudhiiri gali cunugaaga in uu iskuulka usoo lugeeyo ama bashkaleeti soo kaxeysto haddii ay suurto gal tahay ayna ammaan tahay.

Ardeyda waxa loogu talagalay kursi ugooni ah ardey kasta gaadiidka iskuulka. Ardeyda dugsiga dhexana waxa laga rabaa in ay xirtaan afxir marka ay baska sugayaan iyo marka ay saranyihiin.

Iksuulka ayaa toos ula xiriiraya qoysaska si ay uxuusiyaan nidaamyada la dejiyay. Guriga uga wada hadla si wadajir ah waxa aad filaneysaan markaad dib ugu noqotaan iskuulka.

Macaliiintu waxa ay fahansanyihiin in waxbarashada ardeyda ay saameysay xilligi wax lagu baranayay nidaamka khadka, waxa ayna la shaqeynayaan ardeyda si wax looga qabto sameyn kasta.

Xusuunow dhamaanteen waaa in aynu kaalintena ka soo baxnaa si ay carruurto iskuulka ugu noqdaan. Waa muhiim in aad raacdid taladda caafimaadka dadweynaha si uu u noqdo iskuulku mid ammaan ah.

Wixii dheeraad ah eeeg [gov.ie/backtoschool](http://gov.ie/backtoschool)